

## Shixnaddii ugu horreysay oo daawada caruurta ah ayaa timid

Janaayo 18, 2023

Shixnaddii ugu horteysay ee Alberta oo ah daawada dareeraha ah ee acetaminophen taasoo caruurta loogu tala galay ayaa timid waxaana loo qaybin doonaa dhammaan isbitaalada gobolka ku yaala sida ugu dhakhsaha badan.



Ku simaha Gobolka Nathan Neudorf, Myron Keehn, Madaxa Edmonton International Airport iyo Wasiirka Caafimaadka Jason Copping ayaa la kulmay duulimaadkii siday shixnaddii ugu horreysay oo ah daawada xanuunada caruurta ayaga oo kula kulmay Edmonton International Airport.

Shixnaddan oo ah 250,000 oo dhalo waxay sare u qaadi doontaa adeegyada isbitaalada gobolka ku yaala, taasoo xaqiijinaya in helitaanka daawada aan lagala daahin caruurta lagu daaweyay goobtana ay ka helaan daawada qandhajabiyaha ah ee ay u baahan yihiin.

Si uu u helo ansixinta Health Canada, soosaaraha waxaa shuruud looga dhigay in uu soo gudbiyo macluumaaad faahfaahsan oo ku saabsan qorshiiisa ku saabsan tayada, badqabka iyo baakadaynta daawada. Health Canada waxay dib u eegtay qorshihii uusoo bandhigay waxayna ka codsatay macluumaaad dheeraad ah iyo sidoo kale in uu sameeyo wax ka badalo si uu u buuxiyo shuruudaha dhanka sharciga ah ee Canada. Mid kamid ah wax ka badaladan wuxuu ahaa baahida loo qabo in lagu soo daro daboolo si fudud aanay caruurtu ufuri karin oo dhalooyinka leeyihiin marka tafaariiq ahaan lagu bixinayo.

Kumeelgaar ahaan, shixnad horudhac ah ayaa loo oggolaaday in kaliya isbitaaladu isticmaalaan, maadaama daboolada sida fudud aanay caruurtu ufuri karin aysan shuruud dhanka sharciga ah ahayn marka daawada uu qorayo xirfadlaha caafimaadka ee isbitaalka jooga. Sidaa darteed, badalkii la sugi lahaa shixnadda oo dhammaystiran, dowladda Alberta waxay doorbidday in ay hesho shixnaddii ugu horreysay oo daawo ah si isbitaaladu u isticmaalaan.

Shuruudda ugu danbaysa ee ku saabsan daboolada si fudud aanay caruurtu ufuri karin ayaa laga hadlay soosaaruuhuna wuxuu bixiyay dhammaan macluumaadkii ay Health Canada ka codsatay. Dowladda Alberta waxay hadda sugaysaa oggolaanshaha Health Canada ee 4.75 milyanka dhalo ee hartay si tafaariiq ahaan looga iibyo guud ahaanba gobolka, iyo sidoo kale waalidiinta iyo mas'uuliyiinta caruurga reer Alberta.

Marka la helo, daawada waxaa la siinayaa farmashiyada si ay ugu iibyaan qimo waafaqsan qiimaha tafaariiqda ee caadiga ah. Dowladdu waxay ka bixinaysaa lacag yar qiimaha tafaariiqda ee la filayo si ay u hesho daawooyinkaan xilli ay gabaabsi ku yihiin caalamka. Kharashka oo dhammaystiran waxaa la shaacin doonaa marka daawada ay oggolaato Health Canada.

## Warbaahinta

- [Maqal: Laga soo xigtay Wasiir Copping](#)
- [Sawirada shixnado imaanaya](#)